

# Ku soo dhawoow maktabadda!



Maktabaddu waxay u furan tahay dadka oo dhan.

Waxaa maktabadda yaal buugaag ku qoran afaf kala duwan oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn labadaba. Waxaa kaloo halkaas yaal wargeysyo, warsidayaal, buugaag laga barto afka, buugaag ka warbixineysa bulshada, muusig, kombiyuutaro iyo waxyaalo kale oo badan.

Waa lacag la'aan in buugaag laga amaahdo maktabadda.

## Samayso kaarka maktabadda

Si aad u amaahato buugaag oo aad u qabsato waqti aad kombiyuutarka isticmaasho waxaad u baahan yahay kaar maktabad. Kaarka maktabaddu waa lacag la'aan, waxaana lagu isticmaali karaa dhammaan maktabadaha Karlskrona: Haddaba si laguugu sameeyo kaarka maktabadda waxaa lagaaga baahan yahay aqoonsi iyo inaad saxiixdo warqad heshiis ah oo ku raaceyso xeerka amaahashada:

- Adiga ayaa mas'uul ka ah wax alla oo aad amaah ku qaadato.
- Haddaad waalid tahay, adiga ayaa mas'uul ka ah waxa carruurtaadu amaahato.
- Haddaad la soo daahdo soo celinta buugaagta, waxaad bixineysaa khidmad daahidda.
- Haddaad waxyeelayso buugaag ama aad dhumiso, adigaa ku khasban inaad bixiso qiimahooda.

Haddii uu kaarku kaa dhumo, isla markii ku wargeli maktabadda. Haddaad dooneyso inaad samaysato kaar cusub oo aad 18 sano jir tahay waxaad bixineysaa 20 karoon, haddaadse ka yar tahay 18 sano waxaad bixineysaa 10 karoon.

Si aad keligaa mishinka u isticmaasho mishinka amaahashada buugaagta ama aad u qabsato kombiyuutar ama aad u amaahato buugaagta elektarooniga ah waxaad u baahan tahay kood aad aidgu dooraneyso. Shaqaalaha weyddiiso wixii caawimaad ah.

Waqtiga amaahashadu caadi ahaan waa laba toddobaad, laakiin waa gaabnaan karaa - risiidka fiiri mar walba! Wixii aad amaahato waxaad geyn kartaa middii aad doonto maktabadaha dadweynaha oo yaal degmada Karlskrona.

## Booqo bartayada internet

Oo ah [bibliotek.karlskrona.se](http://bibliotek.karlskrona.se) halkaas oo aad ka heleyso diiwaan aad ka raadiso buugaag. Waxaad koontadaada amaahashada ku geleysaa lambarka ku qoran kaarka maktabadda iyo koodka PIN. Tusaale ahaan waxaad sii qabsan kartaa buugaag amaah ku maqan ama waxaad ka arki kartaa buugaagta aad amaahatay ama haddaad dib u amaahan karto. Waxaad kaloo keligaa halkaas ka raadin kartaa buugaag ku qoran afkaaga hooyo oo yaal maktabadda buugaagta caalamka: [interbib.se](http://interbib.se)

## Wax su'aalo ah ma qabtaa?

Haddaad caawimaad u baahan tahay ama aad su'aalo qabto, la xiriiir shaqaalaha maktabadda. Haddii aadan helin buugaagta aad dooneyso oo tusaale ahaan ku qoran afkaaga hooyo, waxaad weyddiin kartaa shaqaalaha. Waxaad kaloo maktabadda weyddiisan kartaa in wax aad dooneyso la soo iibiyo ama laga soo amaahdo maktabado kale.